

Xeer lamb. 6 ee 28 Disember 1963
Habeynta Hey'adaha Canshuuraadka

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay 81 ee Dastuurka.

Kadib markii la arkay qod. 16, 22 iyo 23 ee sharciga lamb 14 ee 3 Juun 1962 ee la xiriira hab dhismeedka Dowladda.

Kadib markii la xusay sharciga lamb 218 ee 20 Agoosto 1963 oo khuseeya qaab dhismeedka dowladda oo u kala qeybsan gobollo.

Kadib markii la garwaaqsaday baahidda loo qabo in la helo nidaam dhinaca Waaxda Canshuuraadka in si loo saadka guud ee dowladda, sida iibinta, keydinta iyo qeybinta saadka lagu carifa sharciga lamb 318 ee 18 Disember 1962 oo ay hal hey'ad maamusho.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

Kadib talo soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Waaxda Canshuuraadka Gobollada

Gobol kasto waxaa laga dhisay magala madaxdiisa Waaxda Canshuraha Waxaa madax loogaga dhigay howlwadeen kaaliye ah oo lagu yeeri doono Madaxa Waaxda Canshuuraha ee Gobolka.

Qod. 2

Howlaha Madaxa Waaxda Canshuuraha Gobolka

Madaxa Qeybta Canshuuraha ee Gobolka wuxuu hoos tegaya Madaxa Waaxda Canshuurada waxaana amri karo Madaxa Gobolka.

Qod. 3

Burin

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka hor imaanaya ama khilaafsan sharcigaa.

Qod. 4

Hirgelinta sharcigaan

Dekretada waxay hirgeli doonta maalinta ku xigta markii lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la farayaa in cid kasto ay u hoggansanato, una hoggamiso cid kasta.

Muqdisho, 29 Oktoober 1963.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirashid Cali Shermarke

Wasiirka Ku meel gaarka ee Maaliyadda

Abdirashid Cali Shermarke

Waa la arkay waana la diiwan geliyey- diwaan lamb1 bogga 189

Muqdisho, 4 Nofeember 1963.

Xisaabiyaha Guud: **Dr. Ahmed Ali Omar**